

## Daahfurka dhiirrigelinta tallaalka

September 13, 2021

---

Dadka u qalma ee reer Alberta ayaa hadda is diiwaangelin kara si ay u helaan \$100 kaarka lacageed ah ee loogu talagalay qaadashada tallaalka koowaad ama labaad ee KOOFID-19.

Dhiirrigelintan halar ah ayaa loogu talagalay dhammaan dadka reer Albert ee jira 18 ama ka weyn ee qaata midka koowaad ama labaad ee tallaalka inta u dhexeysa Sebtembar 3 iyo Oktoobar 14.

Tallaalka ka dib, dadka waxay booqan karaan [alberta.ca/VaccineDebitCard](https://alberta.ca/VaccineDebitCard) oo waxay iska diiwaangelin karaan khadka tooska ah si ay u helaan kaarka lacagta lagu soo shubay. Caafimaadka Alberta wuxuu ansixin doonaa dhammaan diiwaangelinta iyadoo barbar dhigeysa xogta tallaalka gobolka. Bangiga CIBC waxay u qaybin doontaa kaararka lacagta iyagoo matalaya Dowladda Alberta.

15,000 kii ugu horreeyay ee reer Alberta waxay heli doonaan kaararkooda lacagta bisha Oktoobar. Kaararka lacagta ee diiwaan geliyeyasha dheeraadka ah ee u qalma waxaa la soo diri doonaa Noofambar iyo Diisambar.

Dadka reer Alberta ee aan haysan kombiyuutar ama aalad moobil waxay wici karaan 310-0000 si loo caawiyaan.

### Bakhtiyaanasiibka tallaalka

Dhammaan dadka reer Alberta ee qaatay laba qiyaasood oo tallaalka ah oo jira 18 sano iyo ka weyn waxay xaq u leeyihiin \$1 milyan doolar ee soo hartay ee bakhtiyaanasiibka tallaalka Alberta ah. Si aad isu diiwaangeliso oo aad u hesho faahfaahin dhammaystiran, booqo [alberta.ca/lottery](https://alberta.ca/lottery). Isku aadka ugu dambeeya wuxuu xirmayaa Sebtembar 23.

### Ballan qabso oo istallaal

Dadka reer Alberta waxay qabsan karaan ballamaha khadka tooska ah ee [bookvaccine.alberta.ca](https://bookvaccine.alberta.ca) ama wici karaan 811. Liiska rugaha caafimaad ee aan u baahneyn ballan qabsasho ayaa laga heli karaa halkan [albertahealthservices.ca/vaccine](https://albertahealthservices.ca/vaccine).

### Xaqiiqooyin degdeg ah

- Intii u dhaxaysay Juun 1 iyo Sebtembar 9, boqolkiiba 92 dadka reer Alberta ee ku jira qaybaha daryeelka degdegga ah ee qaba KOOFID-19 ayaa aan la tallaalin ama qayb ahaan la tallaalay.
- Laga bilaabo Sebtembar 9, 78.9 boqolkiiba dadka reer Alberta ee u qalma ayaa qaatay ugu yaraan hal kuuro tallaalka iyo 70.9 boqolkiiba dadka reer Alberta ee u qalma ayaa si buuxda loogu ilaalay labada qiyaasood.

## Xogta la xiriirta

- Qabso ballantaada tallaalka KOOFID-19 ([Book your COVID-19 vaccine appointment](#))
- Dhiirrigelinta tallaalka ([Vaccine incentive](#))

## Weydiimaha warbaahinta

[Steve Buick](#)

780-288-1735

Xoghayaha Sare ee Saxaafadda, Caafimaadka

*Si aad u hesho ilo badan oo dawladdu turjuntay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.*